# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

### Golihii 5aad, Kal-fadhigii 12aad, Fadhigii 9aad

**11 August 2025**

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib.

**Gudoonka: -** Siciid Mire Faarax (Giire)

**Ajandaha Fadhiga:-**

1. *Warbixinta Wasaarada Arrimaha Dibada ee Xeerka Ergooyinka Diblomaasiyadeed*
2. *Ansixinta Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Xukuumada.*

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaal sidaynu u balansanayn maanta waxa ajandeheenu yahay laba qodob oo kala ah inay ka dhagaysano Wasiirka Arrimaha Didada Warbixin ku saabsan qaybyo qoraalka Xeerka Ergooyinka DIblomaasiyadeed iyo Ansixinta Wax ka badelka Xeerka Nidaamka Xukuumada.

Mudanayaal, marka hore waxaynu u codaynaynaa Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Xukuumada oo xukuumadu soo jeedisay wax ka badelkeeda, Mudanayaal, xeerkaas madaama aanay doodda Mudanayaasha wax ka soo bixin, Gudiddiina aanay wax ka soo badelin sidiisa ayaynu ugu codayn doonaa hadii EEBE Idmo.

104 qodob ayuu xeerku ka kooban yahay, 29 qodob oo ka mid ayay Xukuumadu wax ka badel iyo kaabs ku soo samaysay, markaanu eegnay dooddii mudanayaasha, 6 qodob ayay aragtidooda ku kala duwan yihiin, wixii kale sidii xukuumadu ku soo gudbisay baynu ugu codaynaynaa.

Waxa fadhiya 48 Mudane, waxa u codeeyay in Xeerka Nidaamka Xukuumada lagu ansixiyo, soo jeedintii Xukuumada, Qodobada Gudidda lagu raacay iyo kuwa doodda ka soo baxay ee loo kala codeeyay waxay noqdeen 45 Mudane, 2 Mudane ayaa diiday, cid ka aamustayna ma jirto, gudoomiyuhuna muu codayn, Xeerkii Nidaamka Xukuumadu Xeer Lr. 71/2025 sidaasuu ku ansaxay.

**Gudoomiyaha:-** Waxaan ku soo dhawaynayaa oo ina hor fadhiya Wasiirka Arrimaha Dibada oo ka warbixinaya qaybyo qoraalka xeerka Ergooyinka Diblomaasiyadeed. Mudane Wasiir ku soo dhawow.

**Warbixinta Wasiirka Wasaarada Arimaha Dibeda iyo Iskhaashiga Caalamiga Md. Cabdiraxmaan Aadan Bakaal:-** Mudane Gudoomiye, Mudanayaal iyo Marwooyin xildhibaanada sharafta leh waxa Sharaf weyn ii ah inaan halkan maanta ka jeediyo khudbad ku saabsan mid kamid ah guulaha stragtey-yadeed ee ay gaadhay wasaarada

arimaha dibeda iyo iskaashiga caalamiga ah intii u dhaxaysay bishii January ilaa June ee sanadkan.

Diyaarinta iyo hirgalinta xeerkan adeega dibeda ee JSL; Xeerka waxa uu yahay tiirka ugu muhiimsan ee dhisaya wasaarad diblomaasiyadeed oo nidaamsan, sharciyaysan oo leh hanaan cad oo hagaya matalaada JSL ee caalamka waxa uu si rasmi ah u qeexayaa qaabdhismeedka safaaradaha iyo qunsilyadaha waajibaadka diblomaasiyiinta iyo ilaalinta danaha qaranka JSL ee dibeda.

Mudane Gudoomiye, Xildhibaanada sharafta leh u jeedada xeerka waxa ka mid ah:

1. In la helo sharci hagaya hawlaha safaaradaha, qunsuliyada, xafiisyada ganacsiga iyo ergooyinka joogtada ah ee JSL.
2. In si cad loo qeexo habraaca magacaabista danjirayaasha, shuruudaha looga baahan yahah iyo waajibaadka laga filayo.
3. In la dejiyo nidaam wax ku ool ah oo lagu ilaaliyo danaha qaranka iyo xuquuqda muwaadiniinta ku sugan dibeda.
4. In la xoojiyo waafaqsanaanta siyaasada arimaha dibeda ee Somaliland iyo qawaaniinta caalamiga ah oo ay ka mid yahiin; Viena convention 1961 iyo Viena convetion 1963.

Xildhibaanada sharafta leh geedi socodka xeerku waxa uu soo maray marxalado muhiim ah, qoraalka rasmiga ah oo si qoto dheer loo diyaariyay laguna soo falanqeeyay talooyinka khubaro sharci, diblomaasiyiin iyo siyaasadeed, qaabaynta dhismaha safaaradaa iyo ergooyinka oo si cad loo qeexay, doorka danjiraha, doorka danjire ku xigeenka, xoghayaasha iyo ergooyinka joogtada ah oo si fiican u qeexan.

Qeexida waajibaadka iyo shaqaalaha ergooyinka oo ay ku jiraan ilaalinta danaha qaranka, horumarinta xildhibaanada laba geesoodka ah iyo qodobadaynta aqoonsiga caalamiga ah; dajinta nidaamka magacaabista oo cad shuruudaha aqooneed iyo khibradeed ee danjirayaasha iyo ilaalinta akhlaaqda iyo anshaxa shaqaalaha.

Ilaalinta xuquuqda shaqaalaha diblomaasiyada oo ay kamid yahiin, mushaharkooda, guryahooda, gaadiidka iyo daryeelkooda caafimaad.

Dhisida nidaam isla xisaabtan oo talaabo ciqaabeed oo ka dhan ah ku xadgudubka waajibaadka; kor u qaadida matalaada Somaliland ee caalamka iyadoo sharci cad lagu hagayo kordhinta iyo kobcinta sumcada caalamka ee JSL. Tayaynta maamulka diblomaasiyadeed iyo abuurista jawi shaqo oo lagu dhiiri geliyo isla xisaabtan intii lagu jiray mudadii u dhaxaysay January ilaa June wasaarada waxay dhamaystirtay diyaarinta xeerkan, golaha wasiirada ayaa si rasmi ah u ansixiyay waxaana loo gudbiyay xafiiska xeer ilaaliyaha guud si loo sameeyo dib u eegis sharciyadeed ta laabada xigta waa in la hor keeno golaha wakiilada iyadoo aan rajeynayno inaad Mudanayaal iyo Marwooyin tixgelin qaran ku ansixisaan.

Ugu danbayn xeerkani waa tiir ka mid ah dhismaha mustaqablka diblomaasiyadeed ee Somaliland waa aalad aan ku midayn karno matalaadeena dibeda ku ilaalin karno muwaadiniinteena ugu diyaar garawno aqoonsi buuxa oo aan helno.

Waxaan idinka codsanayaa inaad si mug iyo miisaan leh u taageertaan ansixinta xeerkan si aynu u dhisno adeeg diblomaasiyadeed oo waafaqsan xeerarka ugu sareeya ee caalamka.

Mudanayaal iyo Marwooyin waxa aan arkayaa iftiinkii wuu inoo muuqdaa ictiraafku weelkeedii beynu sii tolonaynaa waxa weeye beri haddii la ina ictiraafo waa inaynu haysano nidaamkii safaaradaheena, saxfiiradeena iyo diblomaasiyiinteena markaa wakhti badan ma haysano markaa inaga lafteenu waa inaynu dag dag u diyaar garawnaa; Mudnayaal iyo marwooyin xeerkan ansixiya, Wasalaamu calaykum.

**Gudoomiyaha:-**Wasiirku wuu mahadsan yahay, Goluhu waajibaadkiisa ayuu xeerkaas ka gudan doonaa. Mudanayaal, fadhiga barrtio waxa inoo warbixin doona gudiddii golaha ee xaalada abaaraha, waxaynu go'aan ka qaadan doonaa xaaladaas abaaraha, sidoo kale waxa ina hor iman doona Wasiirka Maalgashiga iyo Horumarinta Warshadaha oo isna ka warbixin doona laba xeer oo xukuumadu inoo soo gudbisay oo kala ah wax ka badelka xeerka maalgashiga iyo Xeerka Warshadaha, fadhigiina sidaasuu inoogu xidhan yahay.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada**
---------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
-------------------------------------------